

AMARKA L. 61 rep.

**MAAMULKA WALAAYADA TALYAANIGA EE SOOMAALIYA
MAAREEYUHU**

MARKUU ARKAY xeerka 8, soona baxay 1950 n. 12 lana xiriira magacaabidda iyo ka shaqaysiinta maamulka talyaaniga ee loo aaminay Soomaaliya;

MARKUU ARKAY dekereetada Madaxweynaha Jamhuuriyadda 31 marso 1950;

IYADA OO LA TIXGELINAYO fursadda lagu asaasayo dugsii ula jeeddadiisu tahay in lagu tababaro shakhsiyaad, xushay shacabka degaanka, kuwaas oo awood u leh in ay si tartiib tartiib ah uga qayb qaataan maamulka degaanka, taas oo waafaqsan mabaadi'da ku xusan heshiiska ilaalinta.

WUXUU AMRAYAA

Qod. 1

Waxa Muqdisho laga yagleelay “dugsiga diyaarinta siyaasada iyo maamulka” ujeedadiisu tahay sameynta xubno ku habboon oo si tartiib tartiib ah uga qayb qaata maamulka dalka.

Qod. 2

Kuwa soo dalbada in dugsiga lagu qoro, soona buuxiya shuruudaha soo socda waa loo ogolaan karaa dugsiga:

- a) In uu ka mid yahay dadka degaanka, ama degganaasho ku leeyahay, waana in uusan ahayn ajnabi.
- b) Waa in uu ka weyn yahay 18 jir;
- c) In uu ahaado qof asluub iyo hab dhaqan wanaagsan.

Qod. 3

Waxa la aqbalaa dadka doonaya dugsiga in ay isku qoraan marka ay ku soo gudbaan imtixaanka guddiga uu magacaabay Maareeyuhu.

Qod. 4

Waxaa la soo saari doonaa markaa kaddib nadaamka shaqada dugsiga.

Muqdisho, 26 Sebtember 1950.

**MAAREEYYAHA
Fornari**